Casharka 39

1. Yuu ahaa hoggaamiyihii cusbaa ee Israa'iil oo Ilaah u doortay inuu beddelo Muuse?
-Yashuuca.

2. Miyaa Ilaah dhowray ballankiisii uu siiyey Ibraahim faraciisa ee ahaa inuu siiyod hulkii Kancaan?
-Haa.

3. Kaddib markii Yashuuca dhintay, maxay reer binu Israa'iil sameeyeen?
-Markii Yashuuca uu dhintay, reer binu Israa'iil waxay diideen Ilaah oo waxay noqdeen dad shar badan.
-Kaddib markii Yshuuca dhintay, reer binu Israa'iil waxay samasteen asnaam oo waxay caabudeen asnaamtii, oo waxay geliyeen booskii Rabbigu lahaa.

4. Yaa khiyaaneeyey reer binu Israa'iil si ay ku diidaan Ilaah oo u caabudaan sanam?
-Shayddaan.

5. Haddii aynu caabudno wax aan ka ahayn laah, yaannu caabudaynaa?
-Shayddaan.

6. Waa maxay sababta Shayddaanku dadka ugu hoggaamiyo inay asnaam caabudaan?
-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay Ilaah, oo ma doonayo in qofi Ilaah caabudo.
-Waayo Shayddaanku wuxuu neceb yahay Ilaah oo dooni maayo in cidi badbaaddo.



7. Sidee buu Ilaah u ciqaabay reer binu Israa'iil markii ay sanamka caabudeen?
-Ilaah wuxuu soo kiciyey cadowgii reer binu Israa'iil inay baabi'iyaan dalagyadii ay beerteen dadka Israa'iil.
-Ilaah wuxuu soo kiciney cadowgii reer binu Israa'iil si ay u yimaadaan oo u xadaan loodii reer binu Israa'iil.
-Ilaah wuxuu kaloo soo kiciyey cadowgii reer binu Israa'iil inay soo duulaan oo ay gumaystaan reer binu Israa'iil.

8. Markii reer binu Israa'iil ay qirteen dembiyadooda, oo ay Ilaah weyddiisteen inuu iyaga ka badbaadiyo cadowga, muxuu Ilaah sameeyey?
-Markii reer binuIsraa'iil ay qirteen dembiyadooda, oo Ilaah weyddiisteen inuu badbaadiyo, Ilaah wuxuu doortay rag iyo dumar, ka mid ah reer binu Israa'iil oo hoggaamiya iyaga si ay cadowga uga adkaadaan.

9. Maxaa loo yiqiinnay raggaas iyo dumarkaas Ilaah doortay inay hoggaamiyaan Israa'iil oo naafeeyaan cadowgooda?
-Xaakinnada.

10. Waa maxay sababta Ilaah weli u jecel y ahay oo u daafaco Israa'iil?
-Waayo Ilaah wuxuu ballanqaaday in Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub ay yeeshaa farax aad u badan oo noqon doona wruun weyn.
-Waayo Ilaah wuxuu ballan-qaaday inuu Badbaadiyaha ka soo dhex bixin doono reer binu Israa'iil.
-Waayo Ilaah wuxuu kaloo ballan qaaday inuu farriintiisa, oo ah kitaabka Qoduuska ah, soo dhex marsiinayo faraca Israa'iil.

11. Kuma ayuu ahaa xaakinkii ugu dambeeyey ee Israa'iil?

-Samuu'eel.

12. Ka hor intaanu dhimanin Samuu'eel, maxay Israa'iil weyddiisteen inuu Samuu'eel u sameeyo?
-Reer binuIsraa'iil waxay Samuu'eel inay doortaan boqor iyaga hoggaamiya.

13. Maxaa Samuu'eel taas uga qoomamooday?
-Samuu'eel wuu ka qoomamooday waayo reer binu Israa'iil waxay diideen in Ilaah yahay boqorkooda.

-Ilaah wuxuu doortay in Saa'uul noqdo boqorka kowaad ee Israa'iil.

-Maadaama Ilaah doortay Saa'uul, Ilaah wuuu ka doonayey Saa'uul inuu addeeco Ilaah, laakii Sa'auul Ilaah ma addeecin.

-Marka ay sidaas tahay, Samuu'eel wuxuu u sheegay Saa'uul in Ilaah doortay nin kale oo noqda boqorka Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 13:13-14

13-Markaasaa Samuu'eel wuxuu Saa'uul ku yidhi, Nacasnimo baad samaysay oo amarkii Rabbiga Ilaahaaga ahu kugu amray ma aad xajin. Haatan Rabbigu boqortooyadaaduu ku adkayn lahaa reer binu Israa'iil weligeeba.
14-Laakiinse imminka boqortooyadaadu sii jiri mayso, Rabbigu wuxuu doontay nin ah siduu qalbigiisu doonayo, oo Rabbiguna isaguu u doortay inuu ahaado amiir dadkiisa u taliya, maxaa yeelay, adigu ma aadan xajin wixii rabbigu kugu amray.

-Markii Saa'uul uu Ilaah addeeci waayey, yuu Ilaah u doortay inuu



noqdo boqorka xiga ee Israa'iil?
-Daa'uud.

-Ilaah wuxuu doortay in Daa'uud noqdo boqorka labaad ee reer binu Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii kowaad 16:1 & 13

1-Markaasaa Rabbigu wuxuu Samuu'eel ku yidhi, War ilaa goormaad Saa'uul u ooyaysaa, adigoo og inaan u diiday inuu reer binu Isra'aiil boqor u ahaado? Haddaba geeskaaga saliid ka buuxso oo tag, waxaan kuu dirayaa Yesay ooa h reer Beytalaxam; waayo, boqor baan wiilashiisa ka dhex doortay.
13-Markaasaa Smuu'eel qaaday geeskii saliiddu ku jirtay, wuuna ku subkay isagoo walaalihiis dhex jooga; oo maalintaas intii ka dambaysay Ruuxii Rabbigu aad buu ugu soo degay Daa'uud. Dabadeedna Samuu'eel wuu kacay, oo Raamaah buu tegey.

-Kaddib markii Saa'uul dhintay, reer binu Israa'iil oo dhan waxay u yimaadeen Da'auud inay ka dhigtaan boqor.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii labaad 5:1-4

1-Markasaa qabiilooyinka reer bnu Israa'iil oo dhammu waxay Daa;uud ugu yimaadeen Xebroon, oo intay la hadleen ayay ku yidhaahdeen, Annagu waxaannu nahay laftaada iyo jidhkaaga.
2-Waagii hore oo Saa'uul boqorka noo ahaa, adiguu ahaa kii reer binu Israa'iil dibadda u bixin jirey oo gudaha soo gelin jiray; oo Rabbiguna wuxuu kugu yidhi, Adigu waxaad quudin dootaa dadkayga reer binu Israa'iil, oo amiir baanad u ahaan doontaa reer binu Israa'ii.

3-Sidaas aawadeed odayaashii reer binu Israa'iil oo dhammu waxay boqorkii ugu yimaadeen Xebroon Rabbiga hortiisa, oo iyana waxay Daa'uud u boqreen inuu ahaado boqor reer binu Israa'iil u taliya.
4-Oo Daa'uudna soddon sannadood buu jiray markuu bilaabay inuu boqor noqdo, oo wuxuuna boqor ahaa afartan sannadood.

-Maxay ku kala duwanaayeen Sa'auul iyo Daa'uud?

-Saa'uul ma uusa rumaysnayn Ilaah iyo inuu dembi ku dhashay oo isaga iyo Ilaah ay beri hore kala dhaqaaqeen.

-Laakiin Daa'uud wuxuu garanayey inuu dembi ku dhashay iyo in isaga iyo Ilaah ay kala dhaqaaqeen markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen.

-Sa'uul ma uusan rumaysnayn in Ilaah dembiga ku ciqaabo dhimashada.

-Laakiin Daa'uud wuxuu garanayey in Ilaah dembiga ku ciqaabo dhimashada.

-Sa'uul ma uusan rumaysnayn in Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu isaga badbaaddiyo.

-Laakiin Daa'uud wuxuu garanayey in Ilaah oo keliya uu awoodo inuu wax badbaadiyo.

-Saa'uul ma uusan rumaysnayn ballanka Ilaah ee ah inuu soo dirayo badbaadiyaha.



-Laakiin Daa;uud wuu garanayey in Ilaah soo dirayo badbaadiyaha si isaga uu kaga badbaadiyo Shayddaanka iyo dhimashada.

-Waayo Daauud wuxuu rumaysnaa Ilaah, oo wuxuu qoray qasiiddooyin Ilaah-caabud ah.

-Daa'uud wuxuu qoray sabuurado Ilaah lagu caabudo oo badan, oo ku qoran ilaa iyo maanta kitaabka Qoduuska ah ee Baybalka.

-Maadaama Daa'uud uua haa boqorka Israa'iil, wuxuu haystay lacag aad u badan.

-Maadaama Daa';uud ahaa boqorka Israa'iil, wuxuu dhisay guri weyn oo alwaax, dhagaxaan, dahab iyo qalin isugu jira.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa Daa;uud bilaabay inuu ka fikiro wax ku saabsan guriga isaga uu deggan yahay, iyo sida ay tahay Teendhada shirka ee Rabbiga.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii labaad 7:1-3

1-Oo waxay noqotay markii boqorkii gurigiisii degay oo uu Rabbiga nasasho ka siiyey cadaawayaashiisii ku wareegsanaa oo dhan,
2-In boqorkii Nebi Naataan ku yidhi Bal eeg haatan, anigu waxaan degganahay guri qori kedar ah laga sameeyey, laakiinse sanduuqii Ilaah wuxuu dhex yaal daahyo.
3-Markaasaa Naataan wuxuu boqortkii ku yihdi, Tag, oo wax alla wixii qalbigaaga ku jira samee, waayo, Rabbiga ayaa kula jira.

-Kaddib markii Daa'uud dhammaystriay gurigiisii, muxuu

imminka doonayaa?
-Daa'uud wuxuu doonayaa inuu dhiso Guriga Rabbiga.

-Miyaa Ilaah u baahan yahay guri uu ku dhex noolaado?
-Maya.
-Ilaah wuxuu joogaa meel wakhti waliba, oo welibana uma baahna guri uu ku noolaado.

-Inkastoo Ilaah aanu u baahnayn guri uu ku noolaado, Ilaah wuxuu ku faraxsan yahay in Da'uud uu Isaga ka fikirayo.

-Maxaa haddaba Ilaah ku yiri Daa'ud?

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii labaad 7:12-13a

12-Oo markii cimrigaagu dhammaado, oo aad la seexato awowayaashaa, farcankaaga kaa dambeeya oo kaa soo bixi doona ayaan sara kicin doonaa, oo boqortooyadiisana waan dhisi doonaa.
13-Oo isna guri buu magacayga u dhisi doonaa.

-Inkastoo Ilaah aad ugu faraxsanaa Daa'uud inuu ka fikiray Ilaah, Ilaah wuxuu Daa'uud ku leeyahay Adiga maahan kan Guriga Ilaah dhisaya.

-Waa kuma kan dhisaya guriga Ilaah?
-Waa wiilkii Daa'uud ee ahaa Sulaymaan.

-Waayo Daa'uud wuxuu rumaysnaa Ilaah, Ilaahna wuxuu isaga Daa'uud ah u sameeyey ballanqaad.
-Waana kan ballankii Ilaah siiyey Daa'uud.

Bal aynu akhrinno Samuu'eel kii labaad 7:16



16-Oo reerkaaga iyo boqortooyadaadaba waxaa laga dhigi doonaa kuwo weligood hortaada ku raaga, oo carshigaaguna weligiis wuu dhisnaan doonaa.

-Muxuu ahaa ballanqaadkii ugu weynaa ee Ilaah siiyey Daa'uud?

-Ilaahna wuxuu ballan qaaday inuu Badbaadiyaha ka soo dhex bixin doono faracii Daa'uud.

-Ballankan Ilaah siiyey Daa'uud waa isla ballankii Ilaah siiyey Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

-Ilaah wuxuu soo dirayaa Badbaadiyah oo ah boqorka weligiis iyo weligiis.

-Miyaa Ilaah illoobay ballankii ahaa inuu soo diro Badbaadiyaha?
-Maya.

-Ilaah mar waliba wuxuu xusuusan yahay Ballankiisii ahaa inuu Badbaadiyaha soo diro si uu inooga badbaadiyo dembigaa, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Intaanu daa'uud dhimanin, wuxuu diyaariyey dhismihii guriga Ilaah.

-Dabadeetana, Daa'uud wuxuu wiilkiisii Sulaymaan ahaa u xilsaaray hawsha dhismaha Macbudka Ilaah.

Bal aynu akhrinno Taariikhaha kowaad 22:5-6

5-Markaasaa Daa'uud yidhi, Wiilkayga Sulaymaan waa yar

yahay, waana  tabar daran yahay, oo guriga Rabbiga loo dhisayaana waa inuu ahaado mid aad iyo aad u weyn, oo magac iyo ammaan ku leh kulli waddammada oo dhan, haddaba wax baan u sii diyaarin doonaa.  Sidaas daraaddeed Daa'uud waxyaalo fara badan ayuu diyaariyey intuusan dhiman ka hor.

6-Markaasuu wiilkiisii Sulaymaan u yedhay oo wuxuu ku amray inuu guri u dhiso Rabbia ah Ilaaha reer binuIsraaiil.

-Ka hor Daa;uud intuusan dhiman, wuxuu wiilkiisii Sulaymaan u sheegay inuu dhiso guriga Ilaah.

-Dabadeedna, Daa'uud waa dhintay, oo wiilkiisii Sulaymaan ahaa ayaa wuxuu noqday boqorka dalka Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Taariikhaha kowaad 29:26-28

26-Haddaba Daa'uud ina Yeesay wuxuu boqor u ahaan jiray reer binuIsraa'iil oodhan.
27-Oo wakhtigii uu reer binu Israa'iil boqor u ahaana wuxuu ahaa afartan sannadood; toddoba sannadood ayuu Xebroon boqor ku ahaa, saddex iyo soddon sannadoodna wuxuu boqor ku ahaa Yeruusaalem,
28-Oo wuxuu dhintay isagoo oday ah oo ka dhegay cimri, iyo maal, iyo sharafba, oo waxaa meeshiisii boqor ka noqday wiilkiisii Sulaymaan,

-Kaddiba markii Sulaymaan noqday boqorka reer binu Israa'iil, muxuu sameeyey?

Bal aynu akhrinno Taariikhaha labaad 2:1a

1-Haddaba Sulaymaan wuxuu u qastiyey inuu guri u dhiso



Rabbiga magaciisa.

-Isla sidii aabbihiis Daa'uud u sheegayba, Sulaymaan wuxuu dhisay gurigii Rabbiga.

-Magaca guriga Sulaymaan u dhisay Ilaah ayaa loogu yeeri  jiray macbud.

-Sulaymaan wuxuu dhisay macbudkii ku yiiillay caasimadda Yeruusaalem.

-Caasimadda Yeruusaalem waxay ahayd mid aad u weyn oo ku taallay dhulkii kancaan halkaasoo ay ku noolaayeen Israa'ii-liyiin fara badan.

-Waxaa caaismadda Yeruusaalem ku wareegsanaa derbi ka daafaca cadogu inuu soo galo magaalada.

-Macbudka Sulaymaan u dhisay Ilaah wuxuu la mid ahaa Taambuuggii ay reer binu Israa'iil cidlada ku sidi jireen.

-Sidee baa laysugu masaali karaa macbudkii Sulaymaan dhisay iyo kii reer binu Isra'iil ay cidlada ku sidi jireen?

-Taambuugga Ilaah wuxuu lahaa qofka kowaad oo loogu yeeri jiray Meesha Qoduuska ah.

-Macbudka wuxuu kaloo lahaa isna qolka kowaad oo loogu yeeri jiray qolka Qoduuska ah.

-Taambuugga Ilaah wuxuu lahaa qol labaad oo loogu yeeri jiray Qoduuska Qoduusyada.

-Macbudka Ilaah wuxuu isna lahaa qol labaad oo loogu yeero Qoduuska Qoduusyada.

-Taambuugga Ilaah wuxuu kaloo lahaa daah kala qaybinaya labada qol ama il-xidh.

-Macbudka Ilaahna wuxuu kaloo lahaa daah kala qaybinaya labada qol ama il-xidh.

-Waayo Ilaah waa Qoduus oo wuxuu neceb yahay dembiga oo dhan, haddaba ilaa imisa ayuu wadaadka Sare awood u lahaa inuu galo Qoduuska Qoduusyada?

-Waxay ahayd inuu galo sannadkiiba mar.

-Waayo Ilaah waa qoduus oo wuxuu neceb yahay dembi oo dhan, maxaa hadda wadaadka sare uu ku samayn jiray Qoduuska Qoduusyada?

-Wuxuu dhiigga neefka xoolaha ah ku dul rushayn jiray Sanduuqa Axdiga.

-Muxuu Ilaah samayn doonaa marka uu arko dhiigga wadaadka sare uu ku rusheeyey Sanduqa Axdiga?

-Ilaah wuxuu leeyahay waxaa dib u celinayaa ciqaabtii dembiga ee dadka ilaa iyo hal sannad oo kale inta laga helayo qaan-bax ka wanaagssan.

-Myaa dhiigga xayawaanka awood u leeyahay inuu bixiyo dembiga dadka?
-Maya.



-Waa maxay sababta dhiigga xayawaanka aanu u awoodi inuu bixiyo dembiga dadka?

-Waayo dembiga waxaa lagu gudaa dhishada dembiilaha.

-Kaddib markii Sulaymaan dhintay, maxaa kud hacay reer binuIsraa'iil?

-Reer binuIraa'iil way ku heshiin kari waayeen, kan noqonaya boqorka xiga Sulaymaan.

-Markaasina, 12kii qabiil ee reer binu Israa'iil way qabysameen oo wuxuu noqdeen laba quruumood.

-Tobanka qabiil ee woqooyiga dega ayaa waxay ka go'een labada qabiil ee deegaankoodu ahaa koofurta.

-Maxaa loogu yeeri jiray tobanka qabiil ee woqooyiga dega?
-Boqortooyada Isra'aiil.

-Maxaa loogu yeeri jiray labada qabiil ee koofurta degta?
-Reer Yahuudah.

-Boqorro badan ayaa isaga dambeeyey xukunka boqortooyada Israa'iil, iyo xukunka boqortooyada Yahuudah.

-Badanaa boqorradii xukumi jiray wax xukumi jiray Ilaah ma ayan aaminsanayn.

-Boqorro aan badnayn ayaa Ilaah rumaysnaa.